Maktabadda degmada ee Culturum
Hospitalsgatan 4
611 83 Nyköping

Warbixin
Telefoon: 0155-24 86 86
E-mail: info.biblioteket@nykoping.se

Xafiiska soodhoweynta
Telefoonka: 0155-24 86 86
E-mail: laneexp.biblioteket@nykoping.se

Waqtiyada caadi ahaan xafiisku furan yahay

Isniin-khamiis:	10 - 19
Jimce:	10 - 18
Sabti:	10 - 15
Axad:	12-15 (oktoober – maarso)

Baska buugta
Telefoon: 0155-24 86 86
E-mail: bokbussen@nykoping.se
Waqtiyada baska: bibliotek.nykoping.se

bibliotek.nykoping.se

Uppdaterad 2019-01-07

Xeerarka amaahashada iyo khidmadaha

Nyköping

Xeerarka amaahashada

Qofka maktabadda wax ka amaahda waxaa waajib ku ah in uu ogaado xeerarka maktabadda iyo in la raaco xeerarkaas. Xeerarka amaahashada iyo khidmadahaba isbeddel ayaa ku iman kara.

Kaarka amaahashada

Marka ugu horreysa kaarka amaahashadu waa lacag la'aan. Waxaa loo gooya qofkii wata kaarka aqoonsiga oo aan dhicin. Carruurta da'doodu ka hooseyso 18 sano oo aan aqoonsi haysan waxaa foom gaar ah oo lagu qorayo u saxiixaya waalidka ama qofka mas'uulka ka ah. Haddiise kaarku lumo waxaa la goosan karaa mid cubus oo khidmad laga bixinayo. Waxaana habboon inaad hubiso in ay warbixinahaaga shakhsiyadeed ay ku qoran yihiin diiwaan si haddii loo baahdo laguugu soo diro lharashyada iyo in adareeskaaga laga raadin karo.

Kaarka amaahashadu waa warqad aqoonsi. Haddii kaarku lumo waa in sida ugu dhaqsaha badan loogu wargeliya maktabadda. Sidaas oo kale waa in mar walba maktabadda lagu wargeliyaa beddelidda magaca iyo adareeska.

Waxaad wax ku amaahaneysaa kaarka amaahashada iyo ama lambarkaaga aqoonsiga iyo kood kuu gaar ah. Adiga ayaana mas'uul ka ah in wax walba oo aad amaahatay maktabadda loo soo celiyo waqtigii loo qatay iyagoo aan waxba gaarin. Waalidka ama xannaaneeyaha ayaa mas'uul ka ah waxa carruurtoodu amaahato.

Waqtiga amaahashada

Waqtiga amaahashadu caadi ahaan waa 4 toddobaad. Waxaa dhici kara in la soo rogo waqti amaahasho oo ka gaaban amase waqti ka dheer sida xilliga kulaylaha. Fadlan xaqdhawr waqtiga amaahashada.

Dib-u-amaahasho iyo sii qabsasho

Waxaad shey amaahan kartaa ilaa 5 goor haddii aysan jirin cid sugeysa. Dib-u-amaahashada waxaa laga samayn karaa bogga internet ama maktabadda ama telefoon la soo diro.

Wixii la dalbadana waa in lagu soo doontaa toddoba maalmood gudahood.

Xusuusin

- Haddii aadan wixii aad amaahatay ku soo celin waqtigoodii, waxaa laguu soo dirayaa xusuusin 14 maalmood kadib oo laga bilaabo maalintii amaahdaasi dhacday. Buugta dad kale qabsadeen waa in lagu soo celiyaa maalinta waqtogoodu dhacay maalinta ka dambeysa.
- Haddii aadan xusuusintaas kadib soo celin, waxaa 28 maalmood kadib laguu soo dirayaa kharashkii waxa aad amaahatay. Waxaana dusha laga saarayaa 50 karoon oo ah kharashkii hawsha warqadda qaan-bixinta.
- Haddii aadan soo celin ama bixin kharashkaas, waxaa arrinta loo gudbinayaa shirkad qaan-ururin.

Kharashka alaabta waqtigoodii lala dhaafay

Amaahda dadka waaweyn buuggiiba	4kr/msslintii
Amaah degdeg ah	4kr/maalintii
Kireysiga cajladaha DVD	4kr/maalintii

Waxaa laguu soo dirayaa khidmad la daahid maalinta ku xigta maalinta ugu dambeysa xilliga amaahda. Wixii deyn ama qaan ah oo aan la bixin maalinta alaabtaas la soo celinayo wuxuu ahaanayaa mid weligiis la isku yeesho. Carruurta da'doodu ka yar tahay 18 sano lagama qaadayo khidmadda la soo daahidda. Qalabka isgaarsiinta carruurta oo aysan ku jirin filimada la kireysto lagama qaado wax khidmad la soo daahid ah.

Qiimaha ugu sarreeya ee khidmadda la soo daahidda amaahdu wuxuu markiiba yahay 200 kr. Qiimaha khidmadda la soo daahidda qalabka isgaarsiintu wuxuu yahay 100 kr halkii shayba.

Haddii deynta ama qaanta lagugu leeyahay ay noqoto 50 kr iyo ka badan, waxaa kolkaas lagaa xirayaa dhammaan adeegga maktabadda ilaa inta aad ka bixineyso qaantaas.

Liiska sicirka

Kaar amaah oo cusub	20 kr
Koobbiyeynta warqad A4	2 kr
Koobbiyeynta warqad A3	4 kr
Koobbiyeyn midab ah A4	5 kr
Koobbiyeyn midab ah A3	10 kr
Daabacaad kombiyuutarka/faakis	2 kr/boggii
Faakis – dalka gudahiisa	5 kr/boggii
Faakis – dal kale bogga koowaad	20 kr
Boggaga dheeraadka ah	5 kr
Sawirka madbacadda	5 kr/boggii
Daabacaadda bacda OH	5 kr/boggii

Qiyaasta khidmadaha qalabka isgaarsiinta oo luma ama dhaawacma

Kharashka laga bixinaayo qalabka isgaarsiinta oo luma ama dhaawac soo gaaro wuxuu u dhigmaa qiimaha uu qalabkaasi hadda joogo, laakiin waxaa jira qiime ugu hooseeya oo loo gooyey qalabkaas isgaarsiinta. Haddii aan qalab isgaarsiin oo la amaahday lagu soo celin muddo 28 maalmood ah oo laga bilaabo maalintii ugu dambeysey soo celinta amaahda waxaa lagu xisaabinayaa qalab lumay. Guddiga dhaqanka iyo fasaxyadu wuxuu xaq u leeyahay in uu dulsaaro qiimihii uu u arko in uu ku habboon yahay ama u qalmo.

Kharashyada la gooyey waxaa ka mid ah:

Alaabta dadka waaweyn	250kr
Alaabta carruurta	150kr
Qalabka barashada afka	500kr ama ilaa qiimihii dhabta ahaa
DVD ama qalabka cayaarah TV	600kr
CD-ROM	350kr
wargeysyada	50kr
Buugta galka jilicsan	50kr

Adeegga kombiyuutarada

Haddii aad haysato kaar amaahasho iyo koodka PIN waxaad

- dib u amaahan kartaa (ugu badnaan 5 goor)
- sii qabsan karta ama ka noqon kartaa wax aad sii carbuunatay
- xannibi kartaa kaarkaaga amaahashada
- Iska beddeli kartaa koodkaaga PIN
- Dooran kartaa xusuusinta alaabta aad dalbatay iyo digniinta waqtiga laguugu soo diro e-mail ama sms
- Soo jeedin kartaa in la soo iibiyo alaab aan maktabadda oollin
- Codsan kartaa in maktabado kale lagaaga soo amaahdo
- Ogaan kartaa wixii qaan ah oo lagugu leeyahay

Miyaadan haysan koodka PIN? Soo qaado kaarkaag aqoonsiga oo noogu kaalay maktabadda si aan kuugu sameynno.

Bogga internet ee maktabadda waxaad

- Bogga internet ee maktabadda waxaad
- ku dhegeysan kartaa buug cod ah
- ka soo degsan kartaa muusig kombiyuutarka lagu dhegeysto
- ka akhrisan kartaa wargeysyo ku qoran afafka kala duwan
- ka heli kartaa tusaale buug iyo dhiirrigelin
- ka qabsan kartaa waqti wax laguu sharraxo
- ka heli kartaa warbixin ku saabsan hawlahayaga maktabadda

bibliotek.nykoping.se

Ku soo dhowow maktabaddaada!